

NALA SOO XARIIR

Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan Tareenka Magaalada Seattle [Seattle Streetcar], fadlan booqo boggeena internetka: seattlestreetcar.org

 facebook.com/SeattleStreetcar  @TheStreetcar

Luqadaha kale iyo qaababka lagu heli karo: Macluumaadkan waxaa laguugu siin karaa luqado kale, far waaweyn, Braille, qoraalka elegtaroonigga, ama qaabab kale oo la heli karo. Wac (206) 615-1070.

如果您需要翻译此信息，请拨打 (206) 615-1070。

如果您需要翻译此信息，请拨打 (206) 615-1070。


Si necesita traducir esta información al español, llame al (206) 615-1070.

Nếu quý vị cần phiên dịch thông tin trên phiếu này, vui lòng gọi (206) 615-1070.

本情報の翻訳が必要な場合は、(206) 615-1070 までお電話ください。


RAACIDDA TAREENKA MAGAALADA

- **Ha ku ordin jidka ama meesha tareenka maro** si aad u qabsatid tareenka magaalada.
- Mar kasta waxaad jidka ka gudubtaa meelaha loogu talagalay in laga gudbo ama isgoysyada.
- **Ka fogow geeska dhinaca lagu socdo**, ee la mariyay rinjiga jaalaha, marka tareenka magaalada yimaado iyo marka uu dhaqaaqayo. Ha istaagin meesha marsan rinjiga jaalaha.
- **Marka hore, u baneey in dadka ay ka soo dagaan** tareenka magaalada ka hor inta aadan korin.
- Dadka isticmaala kuraasta lugaha leh ama gaariyada waxay ka geli karaan taagga rarka marka ay riixaan battanka ku yaal dibadda tareenka magaalada, ama gudaha tareenka magaalada.
- **Isticmaal biraha gacanta lagu qabsado** haddii aad ku taagan tahay tareenka magaalada. Waa sahlan tahay in aad lumisid miisaanka marka tareenka magaalada qabto fariinka ama dadajiyo xawaaraha.
- Ha isticmaalin albaabada marka aad maqashid dhawaaqa albaabka oo la xeraayo.



Fiiri labada dhinac

Ha ku tiirsanin biraha la qabsado korkooda



SOUTH LAKE UNION:

Isniin - Khamiis:


6 am - 9 pm

Jimco - Sabti:

6 am - 11 pm

Axadda iyo Fasaxyada:

10 am - 7 pm



FIRST HILL:

Isniin - Khamiis:

5 am - 1 am

Jimco - Sabti:


5 am - 1 am

Axadda iyo Fasaxyada:

10 am - 8 pm



Ilaalinta ammaankaada



Joogso, iska fiiri, oo dhageeyso

City of Seattle  all aboard

VISION ZERO
SAFER STREETS FOR SEATTLE

 SDOT
Seattle Department of Transportation

GUUD

- Tareenka magaalada aad ayay u AAMUSAN yahiin.
- Tareenka magaalada waxay ka dhawaajiyaan **digniinta gambaleelka iyo firimbiga** marka loo baahdo.
- Ma jiro **silig ama waxyaabo ku oodan** oo kala saara tareenka magaalada iyo baabuurta, baskiilada ama dadka socda.
- Tareenada magaalada **ma leexleexan** karaan si ay uga leexdaan waxa ka hor yimaada - waxay ku socdaan jid u gaar ah.
- Marmar tareenada magaalada waxay qabaan nalal u gaar ah, waxayna gudbi karaan jidka marka baabuurta kale aysan gudbi karin.

DADKA LUGAYNAYA

- Waxaad ka gudubtaa meelaha **calaameysan ee loogu talagalay in laga gudbo jidka** tareenka magaalada ama isgoysyada keliya.
- Waxaad mar kasta fiirisaa **labada dhinac** marka aad gudbeysid jidadka tareenka magaalada.
- Marka aad jidka tareenka magaalada ku gudbeysid **kuraasta lugaha leh, qalabka lagu socdo, iyo gaariga caruurta lagu qaado, ka gudub xagal** toosan si aad isaga ilaalisid in lugaha aysan kaaga dhagin meelaha qodan.
- **Iska saar maqalka madaxa lagu surto oo meel iska dhig telefoonada** si aad u maqashid digniinta gambaleelka iyo hoonka tareenka magaalada.




DADKA BAASKIILKA WATTA

- **Waxaad jidadka tareenka magaalada uga gudubtaa xagal toosan** si aad isaga ilaalisid in aadan kuffin. Bacdamaa dooxada jidka xoogaa ka balaaran tahay lugta baskiilka caadiga, waxaa dhici karto in lugta baskiilka ku dhagto meesha dooxan.
- **Ha ku wadin biraha korkooda! Waxaa dhici karto in lugaha baabuurka** kaaga dhagaan meelaha qodan.
- Isticmaal **leemanka baskiilada iyo meelaha baskiilada ka gudbaan**, hadba meesha laga heli karo. Iska ilaali in aad raacdid leenka tareenka magaalada.
- Ku fakar in aad baskiilkaada socod kula gudubtid jidadka tareenka magaalada marka qoyan ama baraf adag saaran yahay jidka, **bacdamaa jidaadka lagu taraaraxo**.
- Ha gelin leemanka u **gaarka ah tareenada magaalada**. Jidadkaan waxaa lagu calaameeyay calaamado iyo baddalaad lagu sameeyo laamiga.
- Isticmaal **calaamadaaha gacanta** si tareenka magaalada iyo wadayaasha ula socdaan danta aad leedahay.



DADKA BAABUURTA WATTA

- Isu diyaari in aad gadaal ka **istaagtid tareenada magaalada**. Tareenada magaalada waxay istaagaan jidka si ay u qaadaan rakaab.
- **Marna ha istaagin, ha meermerin, ama baabuurkaada ha dhigin jidka** tareenka magaalada ama leemanka baskiilka ee la ilaaliyo.
- Ka taxadir marka jidadka qoyan yahiin ama saaran yahay baraf adag - waxaa dhici karto in lagu taraaraxo.
- **Iska ilaali dadka lugta ku socda** ee u degdegga in ay qabsadaan tareenka magaalada ama in ay ka dagaan tareenka magaalada iyo in ay gudbaan jidka.
- Haddii barafaangaha kaaga qaloocda jidka uu maro tareenka magaalada, ka saar jidka, tag leenka la dhigo baabuurka ama meel kale oo ammaan ah, haddii ammaanka ku jiro in sidaas la sameeyo.
- Kahor inta aadan furin albaabka baabuurka, **hubso haddii uu soo socdo tareenka magaalada**.
- **Ha dhigin shay jidka tareenka magaalada marka aad raresyid** ama aad soo dajineysid.



Tareenada magaalada ma leexleexan karaan

